



## **Waxay wax ka qabanayaan kiimikada lead, radon, iyo arrimaha kala ee la xiriira caafimaadka iyo badbaadada.**

Dhalooyinka biyaha sifaysan ee la cabo waxay sii ahaan doonaan kuwa caadiga ah ee la isticmaalo marka ay dugsiyadu furmaan sanad dugsiyeedka cusub, laakiin shaqo ayaa socota si loo bilaabo bedelaada meelaha biyaha laga cabo “drinking fountains” iyo qaybaha ay tuubadu biyuhu ka kooban tahay ‘fixtures’ ee guud ahaan PPS.

Cod bixiyayaashu waxay taageeradooda muujiyeen Maajo taasi oo loogu talagalay wax ka qabashada arrimaha la xiriira caafimaadka iyo badbaadada ee dugsiyada da’da weyn leh ee degmada ku yaala, iyaga oo oggolaaday \$790 malyuun oo ah lacag loogu talagalay wax hagaajinta. Waxa la socda tiradaasi waa \$150 malyuun oo wax lagaga qabanayo kiimikada lead, radon, asbestos iyo badbaadada dabka iyo arrimo kale.

Shaqadaasi waxay bilaabantay horraantii xagaagan iyada oo ay hadda shaqadu sii xoogaysanayo.

PPS waxay shaqaaleysiisay tiro qandaraasleyaal ah oo khibrad u leh tuubooyinka biyaha ‘plumbing’ kuwaasi oo dhowr maalmood gudahood bilaabi doona bedelaada qaybaha ay tuubadu biyuhu ka kooban tahay ‘fixtures’ ee dugsiyada ku yaala. Shaqadani waxay sii socon doontaa iyada oo leh wejiyo kala duwan waxayna socon doontaa inta lagu jiro sanad dugsiyeedka. Tani macnaheedu waa in dugsiyada intooda badani ay muddo gaaban u baahnaan doonaan in ay isticmaalaan dhalooyinka biyaha ‘bottled water’.

Afar dugsi ayaa dib loo rinjiyeeyay si loo dayactiro rinjiga kiimikada lead: Astor K-8, iyo dugsiyada hoose ee Atkinson, Hayhurst, iyo Woodstock. Mashaariic ay qiyaastooda yar tahay oo lagu dayactirayo rinjiga kiimikada lead ayaa hadda ka socda dugsiyada kale waxayna socon doonaan sanadaha soo socda

Shaqada yaraynta kiimikada radon ayaa hadda ka socota Dugsiga Sare ee Alliance ee ku yaala Meek, Dugsiga Hoose ee Lent, Skyline K-8, Dugsiga Dhexe ee Ockley Green, Dugsiga Sare ee Jefferson iyo Peninsula K-5. Ka shaqeynta dhowr dugsi oo dheeraad ah ayaa loo soo bandhigi doonaa si waqti dhow shaqada loogu tartamo.

Hagaajinta nidaamka gambaleelka badbaadada ee dabka sheega ayaa ka socota Dugsiga Hoose ee Duniway, Dugsiga Hoose ee Woodstock, Wilcox, Dugsiga Hoose ee Chapman, Dugsiga Dhexe ee Sellwood, Terwilliger, Dugsiga Hoose ee Humboldt, Sacajawea iyo Beverly Cleary Hollyrood.

Iyada oo uu sanadka dugsiyeedka cusubi soo dhawaanayo, PPS waxay u diyaar garoobaysaa in ay u dabaaldegeto guulo taariikhi ah marka laba dugsi oo taariikhi ah oo si buuxda loo casriyeeyay iyo hal dugsi PK-8 oo dib loo dhisay dib loo furo Ogoosto 30-keeda.

Dhameystirka hawsha ayaa ka socota Dugsiga Sare ee Franklin ee dhawaan la casriyeeyay. Guud ahaan magaalada, shaqaalaha ayaa soo gabagabaynaya dib u cusboonaysiinta dhismaha 1925 Roosevelt, wajiga 2 ee mashruuca casriyeynta. Wajiga 3 ee qurxinta dhulka iyo qaarka mid ah duminta, waxaa la filayaa in la qabto Janaayo 2018-ka. Xafladda furitaanka weyn ee Franklin waxaa la qorsheeyay Sabtida, Sibtambar 2-deeda, laga bilaabo 10:45 subaxnimo ilaa 2 galabnimo. Roosevelt waxay u dabaaldegi doontaa dhacdo gaar ah oo guriga la imaanayo 'homecoming' Jimcaha, Sibtambar 29-keeda.

Dugsiga Faubion PK-8 ee dib loo dhisay waxaa la furayaa Ogoosto, 30-keeda ka dib markii labadii sanadood ee la soo dhaafay wax lagu baranayay Dhismaha Tubman. Xafladda furitaanka weyn ee Faubion waxaa la qorsheeyay Talaadada, Ogoosto 29-keeda, iyada oo bilaabmaysa 3:30 galabnimo. Dhismuhu wuxuu u furnaan doonaa in lagu soo wareego iyada oo dhismayaasheena iskaashigu naga dhexeeyo, Kaiser Permanente, Concordia University, iyo Trillium Family Services sidoo kale goobta joogi doonaan.